Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa – Daraasad Kooban No.3

Barakaca iyo Magaaleynta Xeryaha Barakacayaasha Muqdisho

(Maarso 2019) Daraasaddan waxa ay soo koobeysaa natiijooyinkii ugu muhiimsanaa ee mashruuca cilmibaarista ee Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa ee la sameeyay intii u dhexeysay 2017-2019. Mashruuca Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa oo ay maalgeliyeen DFID iyo ESRC waxa uu diiradda saarayay aragtiyada iyo khibradaha dadka barakacay oo deegaan ka dhigtay afarta magaalo ee Baydhabo, Boosaaso, Hargeysa iyo Muqdisho. Afartan magaalo waxa ay hoos tagaan maamullo siyaasadeed oo kala duwan, laakiin waxa ay wadaagaan dabeecado guud. Marka koowaad, waa magaalooyin si xowli ah u koraya dhanka cabbirka iyo cufnaanta, midda labaad, oo ah mid kamid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee keenay kobocan, waa isu guurguur xooggan oo gudaha dalka ah oo ay sababtay barakac khasab ah. Inkastoo waxyaabo badan oo la xiriira xaaladda dhaqaale iyo bulsho ee dadka barakacay ay wadaagaan magaalooyinka, waxaa jira kala duwanaan dhinaca khibradda taariikheed ee 'magaaleynta xeryaha barakacayaasha' iyo dadaallada gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee lagu maareynayo xeryaha barakacayaasha iyo goobaha kale oo ay degaan barakacayaasha. Qoraalkan kooban waxa uu diiradda saarayaa khibradda barakacayaasha Muqdisho, oo ah caasimadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Sawir qaade: Casho, Muqdisho - Kaam barakacayaal

Natiijooyinka ugu muhiimsan

- Qaar badan oo kamid ah dadka barakacayaasha ah ee ku nool Muqdisho waxa ay wajaheen welina la noolyihiin cabsi ay ka qabaan in goobaha ay ku nool yihiin xoog looga saaro. Waxa ay muddooyinkii dambe loo xikinayay oo ay degayeen duleedka magaalada.
- Xeryaha dadka soo barakacay waxa ay qeyb muhiim ah ka noqdeen dhaqaalaha siyaasadeed ee gargaarka bini'aadamnimo.
- Barakacayaasha inta badan ma helaan adeegyada aasaasiga ah, waxana ay ku tiirsan yihiin gargaar bini'aadamnimo.
- Xaaladda adag ee barakacayaasha waxaa usii wehliya iyaga oo aanan heysanin shaqooyin dakhli kasoo galo iyo suuqa shaqada xoogsiga ah oo tartan loogu jiro.
- Xeerar nidaamiya shaqada iyo shaqaalaha oo aanan jirin (ama in lagu fashilmay dhaqangelinta sharciyadaas) ayaa ka dhigtay barakacayaasha kuwo u nugul in siyaabo kala duwan oo looga xadgudbo isticmaalka xooggooda.
- Dumarka inta badan waxa ay dhabarka u ritaan culeyska dhaqaale ee quudinta qoyska. Rag badan waxaa ku adag in ay qoysaskooda quudiyaan.
- Barakacayaasha waxa ay la kulmaan noocyo kala duwan ee sababa badqab la'aanta jirkooda iyo rabshado ka dhaca xeryaha barakacayaasha iyo magaalada.
- Rabshadaha qoyska waa mid aad u baahsan.

Taariikhda magaalada

Dagaalladii iyo colaadihii ka dhacayay koonfirta iyo bartamaha Soomaaliya tan iyo 1990-aadkii waxaa inta badan raadadkoodii uu ka muuqdaa Muqdisho oo ah caasimadda Jamjuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Lagasoo bilaabo markii la riday xukunkii militariga ee uu hogaaminayay Siyaad Barre sanadkii 1991, Muqdisho waxa ay ahayd magaalo ay ka dheceen dagaallo iyo colaado kala duwan. Waxaa dagaalladaasi qeyb ka ahaa hogaamiye kooxeedyo, Midowgii Maxkamadaha Islaamka, soo gelitaankii quwado ajnabi ah, Al Shabaab, iyo xoogag sharciyad caalami ah heysta sida Howlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya ee loo yaqaanno AMISOM.

Magaalada Muqdisho waxa ay maanta ku jirtaa xaalad kala qeybsanaan gudaha ah oo inta badan lug ku leh dhul iyo hanti lagu muujiyo magac qabiil. Dadka ku nool Muqdisho si mug leh ayuu isku beddelay kadib markii ay dagaallada iyo colaadaha ka qarxeen bilowgii 1990-aadkii waxana ka dhacay dilal aan kala sooc lahayn oo loo geystay dadkii beel ahaan loo xaglinayay xukunkii militariga. Magaalada waxa ay udub dhexaad u ahayd dadaallo dhowr ah oo la doonayay in dowlado qaran iyo maamul hoosaadyo lagu dhiso.



Sawirro satellite-ka qaaday waxa ay muujinayaan kororka dadka deggan waqooyi galbeed ee duleedka Muqdisho sanadihii u dhexeeyay 2012 iyo 2018. Isgoyska Jaamacadda waxa uu hadda kala baraa dhowr degmo oo ay qaar badan oo dadka la wareystay ku nool yihiin (Isha: Google Earth).

Waxa ay xarun u tahay Dowladda Federaalka Soomaaliya oo ay beesha caalamku taageerto, inkastoo dowladdu aanay awood badan ku lahayn dhulka ka baxsan Muqdisho. Intaa waxaa dheer, inkastoo Al Shabaab laga saaray magaalada sanadkii 2011, maleeshiyada waxa ay weeraro ku bartilmaameedsadaan magaalada waxana ay ka qaaddaan canshuur dadka deggan magaalada.

Qaar badan oo maanta ku nool Muqdisho waxa ay lasoo noolaayeen rabshado baahsan iyo ku xadgudub xuquuqda bini'aadamka. Qeyb muhiim ah oo kamid ah dadka ku nool Muqdisho waxa ay la kulmeen barakicin khasab ah, weliba wakhtiyo badan. Sanadihii lasoo dhaafay, magaalada waxaa saameyn ku yeeshay dad badan oo ugasoo haajiray gudaha iyo dibaddaba. Dad ayaa tusaale ahaan kusoo cararay magaalada markii ay ciidamada Itoobiya soo galeen Soomaaliya sanadkii 2006, qaar kale oo badan waxa ay yimaadeen magaalada kadib abaarkii gobollada koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya ku dhufatay sanadkii 2011. Dagaallada u dhexeeya AMISOM, xoogag katirsan Dowladda Soomaaliya, iyo Al Shabaab, oo ay sii dheer tahay abaaraha soo noqnoqday waxa ay iyagana ku khasbeen dad badan oo baadiyaha degganaa in ay badbaado iyo fursado usoo raadsadaan magaalada. Sidaas darteed, Muqdisho si xowli ah ayay u kortay dhanka cabbirka iyo dadkaba tobankii sano ee ugu dambeysay.

Qaabka cilmibaarista loo sameeyay iyo dadka ka qeyb qaatay

Guud ahaan, 2017/2018 cilmibaarayaasha Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa waxa ay wareysteen 120 qofood oo rag iyo dumar isugu jira, intooda badanna ahaa dad barakacayaal ah oo ay da'doodu iyo qabiilladoodu kala duwan yihiin kuna kala nool afarta magaalo. Ilaa 40 qofood oo barakacayaal ah (10 qofood magaalo kasta) ayaa loo qeybiyay kaamirooyin ay u isticmaaleen in ay ku qaadaan sawirro ka turjumaya nolosha maalinlaha ah. Sawirrada ku lifaaqan qoraalkan kooban waxaa qaaday dad barakacayaal ah. Dadka laga wareystay Muqdisho waxa ay intooda badan ka yimaadeen gobollada dhaca koonfurta iyo koonfur galbeed sida Bay, Bakool, Shabeellada Dhexe, iyo Shabeellada Hoose. Waxa ay yimaadeen Muqdisho 1 bil ilaa 7 sano kahor inta aan wareysiga la qaadin. Dhowr qofood oo kamid ah dadka la wareystay waxaa lagu khasbay in ay Muqdisho dhexdeeda dhowr meel u guuraan, waxana lagasoo saaray xeryo barakacayaal kale.



Khariidad: Peter Chonka

Natiijooyinka cilmibaarista

Barakacayaal badan ee ku nool Muqdisho waxa ay la kulmeen ama la nool yihiin cabsi ay ka qabaan in laga saaro goobaha ay deggan yihiin. Sicirka guryaha oo sare u kacay waxa uu kordhiyay tartanka loogu jiro helitaanka dhulka ku yaalla bartamaha magaalada, barakacayaashana waxa loosoo sikiyay duleedka magaalada. Goobaha ay dageen barakacayaasha oo markii hore bannaanaa waxa ay iyadana ka qeyb qaadan kartaa sare-u-kaca qiimaha dhulka. Dadka la wareystay waxa ay ka hadleen sida ay u nadiifiyeen dhul dhir iyo coos badan ku yaalleen, ugana dhisteen cooshado, taasoo soo jiidatay ganacsiga iyo gargaarka bini'aadamnimo. Tanina waxa ay keentay in ay xeryihii barakacayaasha ku milmaan qaabdhismeedka muuqaal iyo bulsho ee magaalda. Wadooyin, gaadiid, iyo goobo biyaha laga dhaansado ayaa la sameeyaa, ganacsiyada yaryarna waxa laga furaa gudaha iyo hareeraha xeryaha barakacayaasha. Maalgelintan oo dhan waxa ay sare-u-qaadeysaa qiimaha dhulkaas, dad sheegta in ay dhulka leeyihiin ayaa soo if-baxa, waxana ay ka saaraan barakacayaashii si ay u iibiyaan ama usii hormariyaan dhulka. Dadka la wareystay waxa ay ka hadleen barakac aan dhamaanin iyo in ay xeryaha barakacayaasha u dhexeeyaan oo mid laga saaro, mid kalana ay ka degaan gudaha iyo hareeraha magaalada. Ka saaridda goobaha ay deggan yihiin barakacayaasha inta badan waxa la sameeyaa iyadoo aanan la siinin digniin, si rabshad wadatana waa looga saaraa. Hantida dadka laga saaray deegaanka inta badan waa la burburiyaa, dadka waa la dhaawacaa inta ay barakicinta socoto, dadka la wareystayna waxa ay indhahooda ku arkeen dad la waxyeeleeyay ama la dilay.

Xeryaha barakacayaasha waxa ay qeyb muhiim ah ka noqdeen siyaasadda dhaqaale ee kaalmada. Shakhsiyaad ay u sahlan tahay in ay dhul helaan (oo iyaga dhulka leh ama heshiis kula jira milkilayaasha) ayaa dhistay xeryo barakac waxana ay ku dhiirrigeliyeen barakacayaasha cusub in ay dhulkooda soo degaan. Marka tirada dadku gaarto tiro badan, horjoogayaasha xeryaha barakacayaasha waxa ay u dhabba-galaan in ay soo jiitaan indhaha kaalmada caalamiga ah si ay iyagana qeybtooda uga helaan. Xaalad kale oo aad u baahsan ayaa ah in la dhisto 'buush bariis': dad deggan xaafado kale oo ku yaalla Muqdisho ayaa iskaashi la sameysanaya horjoogayaasha xeryaha barakacayaasha waxana ay dhisanayaan buush aanan la degganeyn si ay caawinaadda hay'adaha caalamiga ah u helaan. Hay'ado ayaa ku dhaliila hab-dhaqanka horjoogayaasha xeryaha barakacayaasha iyo dhisidda buush bariiska in ay tahay hab gargaarkii looga weecinayo dadkii loogu talo galay. Dadka lagu wareystay cilmibaaristan waxa ay muujiyeen fikrado kala duwan ee ku aaddan howlahan. Waxa ay u arkaan shaqo adag in ay hayaan horjoogayaasha xeryaha barakacayaasha si ay usoo jiitaan indhaha gargaarka caalamiga ah, waxana ay uga mahadcelinayeen in ay hooy iyo waxyaabo kale siiyeen marka ay xerada kusoo biirayeen ama magaalada imanayeen. Dadka lagu wareystay Muqdisho waxa ay si xooggan uga hadleen amniga ay horjoogayaasha siiyaan, iyo in loo baahan yahay in aad xiriir la leedahay dad u dhashay beelaha ku badan deegaanka. In gargaarka caalamiga ah la wadaago waxa ay u muuqataa in ay tahay abaalmarin la filayay in la siiyo horjoogayaasha taasoo looga beddelanayo amniga ay siiyeen barakacayaasha.

Dadka yimaada Muqdisho intooda badan waxa ay ku nool yihiin xeryo barakac oo aanay ku heli karin adeegyada aasaasiga ah sida guryo, biyo, nadaafad, iyo waxbarasho. Dadka la wareystay waxa ay ka hadleen hardanka maalinlaha ah oo ay ugu jiraan helitaanka biyo, iyo nadaafad la'aanta ay ku nool yihiin. Dugsiyada Qur'aanka waxa ay ku yaallaan goobo furan, adeegyana ma heystaan, qaar badanna xitaa ma awoodaan in ay caruurtooda u diraan oo ay iska bixiyaan lacagta dugsiyada. Shaqaaleysiinta caruurta waa mid baahsan, gabdhahana inta badan waxa ay xanaaneeyaan caruurta yaryar halka waalidiinta ay xerada ka baxaan si ay shaqo usoo raadsadaan.

Culeesyada dhaqaale, fursado shaqo iyo xeerarka shaqaalaha oo aanan jirin ayay si xooggan uga hadleen dadkii lagu wareystay Muqdisho. Barakacayaasha waa qeyb muhiim ah oo kamid ah shaqaalaha xoogsatada ah ee magaalooyinka sida xowliga ah u koraya sida Muqdisho. Inta

badan dadkii la wareystay waxa ay ku tiirsanaayeen hal-abuurro yaryar ama shaqo maalmeed: dumarka inta badan waxa ay garaacaan albaabada guryaha si ay shaqo u helaan sida dhar dhaqista, nadiifinta guryaha ama howlaha kale ee guriga. Ragga iyo mararka qaar dumarka waxa ay ku shaqeystaan xamaalinimo ama waxa ay ku dadaalaan in ay shaqo ka helaan mid kamid ah goobaha la dhisayo ee magaalada. Tartanka wuu sarreeyaa dadkana inta badan waxa ay u baahan yihiin in ay xiriir shakhsi ama mid qabiil ku helaan shaqada suuqa. Dadka ku cusub magaalada intooda badan ma laha xiriir fiican.

Sawir qaade: Casho, Muqdisho

Xoogsatada waxa ay wajahaan noocyo badan oo loogu xadgudbo. Dumarka waxa ay la kulmaan dhibaato marka ay guryaha ka shaqeynayaan, qaar badanna waxa ay la kulmeen in lacagta dib looga dhigo ama laga inkiro. Ragga waxa ay ka shaqeeyaan dhismayaasha iyagoo aanan lahayn xeerar badbaado. Haddii ay ku dhaawacmaan shaqada, daawo iyo magdhaw midna ma helaan. Inkastoo xeerarka shaqada iyo shaqaalaha ay jiri karaan, ma jiraan ama way yar yihiin hay'ado u diyaarsan ama doonaya in ay taageeraan dadka haddii xeerarkan la jebiyo.

Barakaca waxa uu u saameyaa ragga iyo dumarka si kala duwan. Dumarka ayaa inta badan dhabarka u rita culeyska dhaqaale ee quudinta qoyska. Waxa ay intooda badan shaqeeyaan saacado badan si ay u helaan lacag yar, waxana ay hayaan masuuliyad dheeri ah oo ah daryeelka caruurta, soo arooridda biyaha, iyo shaqooyinka kale ee guriga. Ragga intooda badan ma awoodaan in ay quudiyaan qoysaska. Rag badan ayaa sidoo kale ku jahwareersan in ay la qabsadaan nolosha magaalada. Jirrada iyo daalka maskaxeed ee ragga waxa ay u muuqataa mid caadi ka noqotay xeryaha barakacayaasha Muqdisho. Rabshadaha qoysaska waa mid ku baahsan xeryaha barakacayaasha iyo goobaha ka baxsan. Dadka la wareystay waxa ay inta badan arrintan la xiriiriyeen amni xumida dhaqaale iyo ragga oo isticmaala khaat. Furiinka ama qoysas kala tagay ayaa ah mid baahsan, xeryahana waxa ay hooy u yihiin dumar badan oo aan la qabin caruurna korsada.

Marka la eego dhibaatooyinka jir iyo dhaqaale oo ay wajahaan, barakacayaasha waxa ay u nugul yihiin khataraha amni ee jirkooda marka ay joogaan xeryaha barakacayaasha iyo gudaha magaalada. Waxaa jira warbixinno dhowr ah oo muujinaya khataraha dhaca iyo kufsiga gaar ahaan dumarka aada goobo ka baxsan xerada barakaca si ay usoo shaqeeyaan. Dumarka waxa ay ka hadleen in ay khatarahan ku yareeyaan iyagoo ka fogaanaya in ay xerada ka baxaan habeenkii, in ay koox isku raacaan marka ay shaqada raadsanayaan, iyo in ay isticmaalaan taleefoonnada gacanta si ay iskula xiriiraan. Guryaha xerooyinka barakacayaasha oo aana si fiican u dhisneyn ayaa difaac yar ka siiya in dad kale kusoo duulaan ama ka difaacaan dagaallada u dhexeeya maleeshiyooyinka, dambiilashaasha iyo xoogagga amniga. Dadka la wareystay waxa ay ka hadleen dad ay ku dheceen xabado wiifto ah ama hoobiye.

Sawir qaade: Hawa, Muqdisho

Isbarbar dhig iyo laga bartay goobaha kale ee cilmibaarista laga sameeyay

Marka la barbar dhigo magaalooyinka kale, Muqdisho waxa ay leedahay taariikhda ugu dheer ee xaaladaha degdegga ah iyo barakac baahsan (bixidda iyo gelidda caasimadda) lagasoo bilaabo sanadihii 2000. Tan iyo markii la dhisay Dowladda Federaalka ah, gargaarka bini'aadamnimo iyo howlaha hay'adaha caalamiga ah waxa ay ku badnaayeen Muqdisho. Gargaarka bini'aadamnimo oo dhawaanahan bilowday in laga fuliyo Baydhabo, oo ay wehliso dagaallada ka socda deegaannada ku hareereysan waxa ay sidoo kale si xowli ah u kordhisay barakacayaasha ku nool Baydhabo. Si ka duwan Baydhabo, barakacayaasha ku cusub Muqdisho ma ahan kuwo kasoo jeeda beelaha ugu badan magaalada waxana ay u nugul yihiin in laga faa'ideysto waxana ay inta badan heshiis lagu sugayo amnigooda la galaan beelaha ku badan deegaanka. Xaaladdan waxa ay ugasii dartaa nooca, heerka iyo

xasaradaha dhulka xoog looga saaro barakacayaasha Muqdisho. Inkasto xoog guryo uga saaridda iyo dhaqaalaha laga sameeyo xeryaha barakacayaasha ay sii kordhayaan si lamid ah Baydhabo, xiriirka qabiil ee u dhexeeya dadka ku cusub magaalada Baydhabo iyo dadka horey u degganaa oo isku dhaw ayaa yareynaya xasarado lamid ah kuwa Muqdisho in ay ka dhacaan. Barnaamijyada dib-u-dejinta Boosaaso iyo Hargeysa waxa ay xal u noqdeen in dhulka xoog looga saaro barakacayaasha sida ku badan Muqdisho. Dadaallada dib-u-dejin ee Hargeysa iyo Boosaaso si weyn ayaa loo bogaadiyay, sharciyeeynta dhulka ee qorshaha dib-u-dejintana waxa uu dadka qaar siiyay dareen amni.

Sikastaba na hoqotee, in deegaanno laga dhisto goobo ka baxsan magaalada waxa ay ugasii dartay kala qeybsanaanta u dhexeysa 'dadka deegaanka asalka ah' iyo 'barakacayaasha' oo ay tahay in laga fogaado marka la qorsheynayo barnaamijyada dib-u-dejinta Muqdisho. Inkastoo deegaannada cusub ee Boosaaso ay xarun dhaqaale noqdeen, waxa ay weli soo jiidanayaan indhaha barakacayaal cusub oo aanan horey uga faa'ideysanin qorshahii dhul-bixinta (oo siinaya lahaanshaha dhulka dadka kadib marka ay muddo degganaadaan). Sidoo kale, deganaansho u eeg mid rasmi ah ee inta badan lagu bixiyo qorshayaalka dib-u-dejinta waxaa lagu dhaliilay in ay yihiin kuwo aan suuragal ahayn in lagu guuleysto. Qorsheynta magaalada wakhtiga fog waxa ay u baahan tahay in xal loo helo arrimahan si loo xaqiijiyo in dadka nugul ay si fiican uga faa'ideystaan. Sikastaba ha noqotee, marka la eego xaaladda amni ee Muqdisho oo ah mid liidata, dadka qorsheeya magaalooyinka waxa ay wajahayaan caqabado la xiriira in ay barakacayaasha iyo dadka nugul oo dhan ku daraan qorshaha dib-u-dejinta. Arrinta ugu weyn waxa ay u badan tahay in ay noqon doonto helitaanka dhul bannaan. Balse khibradda magaalada Boosaaso ama Hargeysa waa in wax laga bartaa. Wadatashiyo waa in lala sameeyaa dadka ay suuragalka tahay in ay dhul bixiyaan, saraakiisha dowladda, iyo sidoo kale dadka la doonayo in ay ka faa'ideystaan barnaamijka.

Natiijooyinka cilmibaaristan waxaa loo jeediyay maamullada dowladaha hoose, hay'adaha gargaarka caalamiga ah, bulshada rayidka iyo ka qeyb qaatayaasha cilmibaarista ee afarta magaalo iyadoo bandhig sawirro iyo doodo la sameeyay bishii Janaayo ee sanadka 2019. Faafaahin buuxdo ee mashruuca iyo bandhigyada waxa aad ka heli kartaa halkan: http://securityonthemove.co.uk/events/ Bandhigyo lamid ah waxaa lagu qabtay Oslo (Febraayo 28), London (Maarso 14), iyo Nayroobi (Abriil). Haddii aad qabto su'aal la xiriirta cilmibaarista fadlan la xiriir Jutta.bakonyi@durham.ac.uk ; peter.chonka@kcl.ac.uk ; manedle100@gmail.com ama kirsti.stuvoy@nmbu.no

[Warbixintan waxaa turjumay Tayo Translations]